

# Isbaddallada lagu sameeyey Codsiga Dib u Cusboonaysiinta ka Dhaafidda 1115(a) ee Oregon

Dukumiintigaan wuxuu sheegayaa isbaddallo lagu sameeyay cusbooneysiinta Oregon ee 1115(a) ee Kadhaafida ee u dhexeysay codsigii qabyo qoraalka ahaa ee loo daabacay dadweynuhu si uu fikirkiisa uga soo dhiibto (lasoo dhajiyay Diseembar 7, 2021) iyo codsigii kama dambaysta ahaa ee loo soo gudbiyay CMS (Feebaraayo 18, 2022). Isbaddallada waxaa isku dubarida mawduuca siyaasadda oo qeybaha codsiga ee isbaddallada habboon lagu sameeyayna ayaa la liis gareeyay.

<b>Mawduuca siyaasadda</b>
■ <b>Kordhinta Caymiska iyadoo loo marayo Qorshaha Caafimaadka Oregon</b>
■ <b>Wanaajinta Natiijooyinka Caafimaadka iyadoo la Nidaaminayo Kala-guurka Nololaha Iyo Caymiska</b>
■ <b>Miisaaniyadda Guud ee Qiimaha Ku Salaysan</b>
■ <b>Dhiirigelinta Daryeel loo Siman Yahay</b>
■ <b>Maalgelinta Sinnaanta Diirada Saartay</b>
■ <b>Mawduucyada kale ee siyaasadda</b>

## Isbaddallada codsiga (Feebaraayo 2022)

<b>Kordhinta Caymiska iyadoo loo marayo Qorshaha Caafimaadka Oregon</b>	
<b>Sharraxaadda Isbaddalka</b>	<b>Qeybaha Codsiga</b>
Iyadoo la adeegsanayo wada hadallo lala yeeshay CMS, OHA wuxuu go'aamiyay in kadhaafidda 1115 uusan ahayn dhabbe habboon oo loogu tala galay isdiiwaangelinta la dedejiyay ayadoo loo marayo siyaasadda SNAP waqtigaan waxaana laga saarayaa codsiga kadhaafidda.	Qeybta I. Sharraxaadda Barnaamijka Qeybta II. Kadhaafidda iyo Maamullada Qarash Bixinta

<b>Wanaajinta Natiijooyinka Caafimaadka iyadoo la Nidaaminayo Kala-guurka Nololaha Iyo Caymiska</b>	
<b>Sharraxaadda Isbaddalka</b>	<b>Qeybaha Codsiga</b>
Dhallinyarada leh Baahida Daryeelka Caafimaadka Gaarka ah	Qeybta III. U-qalmida Qeybta IV. Manaafacaadka iyo Wadaagidda Qiimaha

## Wanaajinta Natiijooyinka Caafimaadka iyadoo la Nidaaminayo Kala-guurka Noloshaha Iyo Caymiska

<ul style="list-style-type: none"> <li>• Waxay caddeysay kororka manfaca ee aragga iyo ilkaha ee shirkadaha kordhiyay heerka dakhliga u qalmidda ee loogu tala galay dadkaan.</li> <li>• Loo cusbooneysiisay inuu muujiyo go'aanka sharuuduhu ay ku ahaanayaan kuwo intii hore ka xadidnaan yar taasoo loogu tala galay xirmada manfaca kumeelgaarka ah ee loogu tala galay YSHCN.</li> </ul>	
<p><b>Shaqaalaha Caafimaadka Dhaqanka</b> Si ku salaysan talada bulshada iyo baahida meesha looga saarayo caqabadaha kugudban adeegyada waqtiyeysan ee asaagga (PDS), OHA wuxuu ka codsanayaa maamulka loogu tala galay PDS si loo gaarsiiyo ayadoo uusan jirin kormeer caafimaad ama kormeer kabaxsan qorshaha daaweynta.</p>	<p>Qeybta I.Sharraxaadda Barnaamijka Qeybta IV. Manaafacaadka iyo Wadaagidda Qiimaha</p>
<p><b>Nidaamka Caddaaladda Carruurta</b> Si ku salaysan jawaabcelinta ka socota la hawlgaleyaasha dawladda ee hayadda gobolka iyo maxalliga, oo ay kujiraan wadahalallo baahsan oo lala yeesho Maamulka Dhallinyarada ee Oregon (OYA), OHA waxaa uu wax ka baddali doonaa soo jeedinta ka dhaafidda ee loogu tala galay dhallinyarada kusugan goobaha asluubta ee u adeegidda xiran OYA si loo codsado uqalmidda xaddidan ee Medicaid ee loogu tala galay diiwaangalinta xaddidan ee CCO ee xirmada manfaca adeegyada kumeelgaarka ah. Codsiga xirmada manfaca ee loogu tala galay dhallinyarada xarumaha lagu xiro carruurta ee maxalliga ah waxaa uu ahaan doonaa midaan isbaddalin Isbaddallada dheeraadka ah ee gaarka ah hoos ayay kuxusan yihiin:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• La cusbooneysiisay si loogu soo daro sixitaannada OYA iyo carruurta degmada labadaba iyo qodobeynta kala duwanaanshiyaha</li> <li>• La cusbooneysiisay si wax looga qabto caymiska manfaca ee loogu tala galay dadka waaweyn ee kujira haynta tooska ah ee OYA ayadoo ay hoos imaanaysa awoodda sharci ee DOC</li> </ul>	<p>Qeybta I.Sharraxaadda Barnaamijka Qeybta III. U-qalmida Qeybta VI. Dhexdhexaadnimada Maaliyadda iyo Miisaaniyadda</p>
<p><b>Nidaamka Caddaaladda iyo Jeelasha Qabiilka</b> Codsiga hore ee Qabiilada iyo Wadatashiyada Qabiilka iyo Wadahalallada Magaalada ee Hindida, luuqad lagu daray oo caddeyneysa in isla siyaasadihii isku midka ahaa ee loogu tala</p>	<p>Qeybta I.Sharraxaadda Barnaamijka Qeybta III. U-qalmida</p>

## Wanaajinta Natiijooyinka Caafimaadka iyadoo la Nidaaminayo Kala-guurka Noloshaha Iyo Caymiska

galay jeelasha maxalliga ah iyo kuwa degmada ay khuseynayaan jeelasha Qabiilka.	Qeybta IV. Manaafacaadka iyo Wadaagidda Qiimaha
<p><b>Dhacdooyinka Cimilada ee Daran</b> Si ku salaysan fikirka dadweynaha iyo marka loo eego codsiga Qabiillada iyo Wadatashiyada Qabiilka iyo Wadahadallada Magaalada ee Hindida, OHA wuxuu ku darayaa codsi loogu tala galay internet xawaare sare leh ama taageero kale oo internet si loogu caawiyo dadka waaweyn iyo carruurta si loo helo adeegyada muhiimka ah, sida waxbarashada iyo daryeelka caafimaadka, maadaama ay qeyb ka tahay Go'aaminta Bulshada iyo xirmada adeegyada Kalaguurka Caafimaadka ee loogu tala galay dhacdooyinka cimilada ee daran.</p>	Qeybta I.Sharraxaadda Barnaamijka Qeybta IV. Manaafacaadka iyo Wadaagidda Qiimaha
<p><b>Adeegyada Daaweynta ee Daganaanshiyaha Dhimirka (PRTS) Awoodda Daryeelka Cunugga</b> Waxay dhintay heerka faahfaahinta ee Qeybta I ayna u dhaqaajisay faahfaahinta oo buuxda Qeybta V.</p>	Qeybta I.Sharraxaadda Barnaamijka Qeybta V. Nidaamka Gaarsiinta iyo Heerarka Lacag Bixinta

## Lacag Bixin Qiime Kusalaysan

Sharraxaadda Isbaddalka	Qeybaha Codsiga
Si ku salaysan jawaabcelinta la helay intii lagu jiray fikirka dadweynaha, OHA wuxuu meesha ka saarayaa codsigiisii ee loogu tala galay liis xiran oo ka socda codsiga kama dambaysta ah.	Qeybta I.Sharraxaadda Barnaamijka Qeybta IV. Manaafacaadka iyo Wadaagidda Qiimaha
Si ku salaysan jawaabcelinta la helay intii lagu jiray fikirka dadweynaha, OHA wuxuu codsanayaa ansixinta kasocota CMS si loo ogolaado kasaaridda ansixinta daawooyinka oo leh caddeyn aan ku filnayn oo ah awoodda caafimaad. Qorshahaan waxbaa laga baddalay si wax looga qabto walaacyada lagu soo bandhigay fikirka dadweynaha. Maamulka Oregon wuxuu doonayaa ansixin lagu xaddidaayo caymiska daawada ee lagu ansixiyay dhabbaha la dardargaliyay, ee hoos imaanaya daruufo ciriiri ah. Qorshahaan waxaa hoos imaanaysa in maamulka Oregon uu ka faaiideysanayo waqtiga loo qabtay warqadda ansixinta ee FDA iyo xaqiijinta dib u eegidda	Qeybta IV. Manaafacaadka iyo Wadaagidda Qiimaha

## Lacag Bixin Qiime Kusalaysan

faaiidada xogta ee qoraalka asaagu dib u eegidda ku sameeyay ama clinicaltrials.gov. Adeegsiga hagidda FDA uu dejiyay iyo jadwallada waxay xaqiijisaa heer caalami ah oo la wada aqbalay, oo leh suurto galnimo caafimaad iyo heshiiska dammaanad qaadaha dawada.

## Dhiirigelinta Daryeel loo Siman Yahay

Sharraxaadda Isbaddalka	Qeybaha Codsiga
Waxaa la baddalay tirada cabbirka sare min 3-5 ilaa 6 si loo xaqiijiyo fursad kufilan si diiradda loo saaro mawduucyo badan oo ku saabsan sinnaanta caafimaadka. Tirada cabbirka ayaa si taxaddar leh loo tixgaliyay si loo xaqiijiyo in sinnaanta si ku filan diiradda loo saaro ayadoo aan si ka tan weyn loo cusleyn bixiyeyaasha.	Qeybta I.Sharraxaadda Barnaamijka Qeybta V. Nidaamka Gaarsiinta iyo Heerarka Lacag Bixinta
Waxaa lagu daray Guddiga Cabbirka Tayada Sinnaanta Caafimaadka ee la qorsheeyay (HEQMC) inuu lahaan doono wakiil ka socda Guddiga Caafimaadka Habdhaqanka. Guddiga Caafimaadka Habdhaqanka waa guddi uu leeyahay Guddiga Qorshaha Caafimaadka ee Oregon kaasi oo qorshehiisu yahay in la kordhiyo tayara adeegyada caafimaadka habdhaqanka iyo in isbaddal lagu sameeyo nidaamka caafimaadka habdhaqanka ee Oregon ayadoo loo marayo natiijooyin horumarsan, cabbirro iyo dhiirgalin.	Qeybta I.Sharraxaadda Barnaamijka Qeybta V. Nidaamka Gaarsiinta iyo Heerarka Lacag Bixinta

## Maalgelinta Sinnaanta Diirada Saartay

Sharraxaadda Isbaddalka	Qeybaha Codsiga
OHA wuxuu caddeeyay codsiga si uu u muujiyo ula jeedka Iskaashatooyinka Maalgashiga Bulshada ee gobolka CICs) waa in loo wareejiyo awood iyo ilo badan oo jira, hay'ado ay bulshadu hoggaamiso.	Qeybta I.Sharraxaadda Barnaamijka
OHA wuxuu u caddeeyay codsiga loogu tala galay 3% qarash gareynta CCO sida uu amray HB 3353 in loo xisaabiyo sidii qarash ku baxay caafimaad.	Qeybta II. Kadhaafidda iyo Maamullada Qarash Bixinta

## Mawduucyo Kale

Sharraxaadda Isbaddalka	Qeybaha Codsiga
<p>Maamulka Oregon ma doonan doono soo cusbooneysiinta kadhaafid muddo dheer oo ku xeeran Baaritaanka Kahortagga ah ee Hore, Ogaanshaha Cudurrada, iyo Daaweynta (EPSDT) loogu tala galay carruurta. Go'aanku wuxuu imaanayaa kagadaal jawaabcelin cad oo katimid bulshada, udoodayaasha, ururrada adeegga carruurta, iyo dhinacyada kale ee danaynaya. Maamulka Oregon wuxuu sii wadi doonaa inuu ku saleeyo manaafacaadka OHP Liiska Mudnaanta Lasiyay ee Adeegyada Caafimaadka, si kastaba ha ahaatee, Maamulka Gobolka ayaa qabanqaabin doona oo wax loo heli karo carruurta ka dhigi doona dhammaan adeegyada lagama maarmaanka u ah caafimaadka ee loo doonayo daaweynta xaaladaha la tilmaamay inay qeyb ka yihiin baaritaanka EPSDT.</p>	<p>Qeybta I. Sharraxaadda Barnaamijka Qeybta II. Kadhaafidda iyo Maamullada Qarash Bixinta</p>
<p>Maamulka Oregon ma dooni doono inuu dib u cusbooneysiyo ka dhaafidda ogolaata diidmada caymiska dib u celinta.</p>	<p>Qeybta II. Kadhaafidda iyo Maamullada Qarash Bixinta</p>

Waxaad ku heli kartaa dokumintigaan luuqado kale, daabacaad balaaran, qoraalka camoolka ama qaabka aad doorbidi. Kala xiriir Barnaamijka Wacyigelinta Iskaashatada Bulshada (Community Partner Outreach Program) [community.outreach@dhsosha.state.or.us](mailto:community.outreach@dhsosha.state.or.us) ama adigoo wacaya 1-833-647-3678. Waanu aqbalnaa dhammaan wicitaannada dadka dhagaha adag ama waxaad garaaci kartaa 711.